

Taariikhda Nuruddin Farah




Qoraaga Nuruddin Farah. Wuxuu ku dhashay Baidoa, sannadkii 1945kii taas oo xilligaas ka tirsaneed Italian Somaliland. Waxa uu sheegay in uu ka soo jeedo qoys suugaanyahano ah . Wuxuu wax ka bartay dugsi ku yaalla magaalada Qallafo ee ku yaalla Ogadenia, oo ah magaalo u dhaw xuduudda Itoobiya iyo Somalia. Markii uu Ingiriisku ka baxay wadanka , waxaa qarxay dagaal u dhexeeya Itoobiya iyo Soomaalidii degeneeyd Ogadenia, iyadoo qoyskii Faarax ay u qaxeen Muqdisho. Qalalaashaha ka dib wuxuu bartay shan luqadood oo kala ah Soomaali, Amxaariko, Ingiriis, Talyaani iyo Carabi.

Faarax wuxuu falsafadda iyo suugaanta ka bartay Jaamacadda Chandigarh ee Hindida wuxuuna qoray buugiisa koowaad, kaas oo uu ka helay sumcad iyo aqoonsi xirfad qoraanimo, Farah markii uu daabacay buugiisii labaad 1976 ee uu kaga hadlay daryeelka dumarka waxaa dhibsaday maamulkii General Siyaad Barre, taas oo Faarax ku qasabtay inuu waddanka ka qaxo muddo 22 sannadood ah isagoo ku noolaa baadiyaha waddanka iyo wadamo dibadda ah sida wadamo Afrikaan ah, Bariga dhexe, Yurub iyo Mareykanka, wuxuu wax ka bartay London, Roma iyo Beiruud iyo meelo kale. Wuxuu Somaliadib ugu laabtay 1996 isagoo ka maqnaa muddo 22 sanno ka badan isgoo mararka qaar mutaystay xabsi sharcidarro uu ku tilmaamay.

Faarax wuxuu ku guulaystay abaalmarinta caalami ah ee loo yaqaano “Noble Prize” Xeeldheerida qoraalkiisa ayaa soo jiidatay akhristayaal badan , gaar ahaan buugagta kala ah "Caano macaan iyo Caano dhanaan", "Sardin ciyaaraya" iyo "Wadaaddada iyo jannanka". Saddexdan buug wuxuu kaga faalooday xaalado kala duwan oo ku saabsan nidaamkii Siyaad Barre, buugtan waxaay soo gaareen Holland oo aad looga akhristay, Sidoo kale buugiisa Qarsoodi wuxuu soo jiitay akhristayaal badan wuxuuna ku mutaystay in la guddoonsiiyo abaalmarinta loo yaqaan “Nobel Prize for Literature” sannadkii 1998, wuxuu sidoo kale hantay abaalmarino kale, buugaagtiisa waxaa lagu tarjumay luqado farabadan ee adduunka, waxaa sidoo kale lagu amaanay xigmadda iyo farshaxanka uu ku soo bandhigo qoraaladiisa sida buugga “Qarsoodi” Nuuradiin Farah waxaa aad u amaanay qorayaal dhowr ah sida Salmaan Rushdi oo ku tilmaamay in uu Nuuradiin yahay qoraaga ugu heer sareeya Afrika, waxaa sidoo kale amaantay haweeneyda wax qorta ee Nadiin Gordimer o ku tilmaamtay Farah in uu yahay kan si cilmiyeesan u soo bandhiga dhibaataada dhabta ah ee ka jirta qaaradda Africa.

Nuruddin Farah iyo buugiisii “Qarsoodi”



Soomaaliya markii uu sii dhamaanaayay dagaalkii sokeeye. Inkastoo caasimadda Muqdishu dhawaaqa qalabka hubka mashiinka ah wali la maqlaayay, ayaa Kalaman oo ah wiil ganacsada ah oo ku nool Mogadishu soo booqatay jaceylkiisii caruurnimada Sholoongo, oo la sheegay inay leedahay awoodo Indhasarcaad leh. Waxay u timid inay weydiiso Kalaman sua`al la xiriirta ballan ay is ku dhaarsadeen dhallinyada nimadoodii in uu wali xasuusto.

Booqashada Sholoongo, Kalaman waxay dib u xasuusisay xaaladii dhalinyaranimadoodii. Wuxuuna si calool jilicsan leh u xasuustay arimo isugu jiray sir qarsoodi ah iyo khuraafaad uu filaayay in laga soo gudbay bari hore.

Maaddaama Kalaman uu wax badan ka ogyahay sirta qarsoodiga ah ee qoyskiisa, hadana waxa uu ku khasbanyahay in uu runta ka sheego isirkiisa iyo heebta uu ka soo jeedo.

Buugan waxaa daabacay maktabadda De Geus, ee magaalada Breda ee Holland sannadkii 2000, ayadoo la kaashaneysa NOVIB / NCOS. Waxana tarjumay Erika Peeters. ISBN 90-5226-650-6.